

Ha ahaato Minnesota #1 dhanka ka qaybgalka codaynta oo naga caawi yaraynta faafitaanka COVID-19!

Dadka reer Minnesota ayaa wada jir uga wada shaqaynaya inay nabad qabaan oo midba midka kale caafimaadkiisa ilaaliyo. Sanadka 2020 taasi micnaheedu waa guriga in laga soo codeeyo! Minnesota dhexdeeda, cod bixiye kasta oo u qalma ayaa wuxuu dooran karaa inuu ka soo codeeyo guriga isagoo codsanaya warqada codbixinta maqnaanshaha. Waxaad codsan kartaa warqaddaada codbixinta ee doorashada Noofember 3, 2020.

- Waxaa laguugu soo diray waraaqdan sababta oo ah waxaad tahay codbixiye ka diiwaan gashan Minnesota.
- Habka ugu wanaagsan ee aad ku codsan karto warqaddaada codbixintu waa khadka internetka www.mnvotes.org.
- Haddii aad horay u soo dirtay Foomka Codbixinta Maqnaanshaha, mid kale ha soo dirin.

Soo booqo www.mnvotes.org ama soo wac 1-877-600-VOTE si aad waxbadan uga sii ogaato.

Talaabooyinka Ka Soo Codaynta Guriga

1. Si aad uga codbixiso doorashooyinka guud ee Nofeembar 3deeda, WAA INAAD tahay codbixiye diiwaangashan.

Waxaad codsan kartaa warqadda cod bixinta maqnaanshaha isla wakhtiga aad isu diiwaangelinayso codbixinta.

Waxaad ka hubin kartaa isdiiwaangelintaada khadka internetka ee shabakadda www.mnvotes.org.

2. Ka codso warqaddaada codbixinta barta internetka oo ah mnvotes.org.

3. Haddii aadan haysan internet, ama aad jeceshahay inaad foomka ku soo celiso boostada, waad buuxin kartaa

foomka lagu codsado Foomka Codbixinta oo aad soo saxiii oo aad taariikhda ku qor.

4. Haddii aad isticmaasho foomka warqada ah, boostada ku soo dir sida ugu dhakhsaha badan si aad u xaqiijiso wakhtiga boostada laguugu soo dirayo

adiga. Kharashka boostada waa la bixiyey, looma baahna in aad kusoo dhejiso istaam.

Meelaha badankood waxay bilaabaan ku soo dirista boostada

warqada codaynta qiyaastii 6 todobaad kahor Maalinta Doorashada.

5. Raac tilmaamaha si aad u codayso oo aad u soo celiso warqaddaada codbixinta marka boostada laguugu soo diro.

6. Kala soco xaalada kaarka codbixintaada oo xaqiiji in la helay lana aqbalay mnvotes.org.

Dhammaan cod bixiyeyaasha u qalma ayaa lagu dhiirigelinayaa inay ka soo codeeyaan guriga, laakiin meelaha codbixintu waxay u furnaan doonaan maalinta doorashada dadka u baahan ama doonaya inay shakhsi ahaan u codeeyaan.